

Unofficial translation

Wax-saxaafadeed uu soo saaray Ergayga Gaarka ah ee Midowga Yurub ee Soomaaliya

09/01/2014

Ergayga Gaarka ah ee Midowga Yurub, Michele Cervone d'Urso wuxuu ugu hambalyeynayaa Mudane Cabdiweli Gaas doorshadi loo doortay Mdaxweynaha Dowladda Puntland ee Soomaaliya.

"*Waxaa runtii ahaa sharaf maanta in loo noqdaa goob-joog dimuqoraadiyadii oo hirgeleysa. Wawaan ku ammaanayaa dadka reer Puntland, Odayaasha dhqanka, Culimada diinta, dhamaan murashaxiinta iyo baarlamaanka hanaanka hufan ee nidaamsan ee danaha Puntland mudnaanta hore loo siiyey. Doorashoooyinka waxay u gogol xaarayaan sidii mar kale isugu xirmi lahaayeen Puntland iyo soomaaliya hanaanka dimuqoraadiga ah*", waxaa yir Ergayga Gaarka ah ee Midowga Yurub.

"*Waxaan kaloo jeclahay in aan ku ammaano Madaxweyne Faroole hogaaminta dowladnimo iyo dadnimo. Dhaxalgalkiisa taariikheed ee ahaa soo afjaridda ku-meel gaarnimada iyo dhisidda dowlad horseedi doonta Somaaliya Federaal ah waa mid aan la illoobi doonin.*"

Midowga Yurub wuxuu bar-bar taagan yahay Puntland wuxuuna rajaynayaa inuu si dhaw ula shaqeeyo Madaxweynaha cusub iyo dowladiisa. (Dhammaad)



EU MISSION TO SOMALIA

Delegation of the European Union to Kenya

P.O. Box 45119 Nairobi | Insurance House, Ragati Road, Upper Hill

Tel.: +254 (0)20 280 20 00

Email: SOMALIAMISSION@eeas.europa.eu

Website: <http://www.eu-somalia.eu>

Twitter: [@SomaliaEU](#) | Flickr: [EUSomalia](#) | Youtube: [EU SOMALIA](#)